NG#_____

Seattle World School Teen Health Center

Waalidiinta iyo Ilaaliyayaasha qaaliga ah ee ardayda Seattle World School (Dugsiga Dunida Seattle)

Caruurtaada hada waxay dugsiga ka heli karaan daryeel caafimaad!

Hada waxaa jira Xarunta Caafimaadka Dugsiga ku Salaysan oo ku taala dhismaha dhexdiisa una diyaara dhamaan ardayda Seattle World High School. Xarunta Caafimaadka waxaa masuuliyadiisa qaaday International Community Health Services (Adeegyada Caafimaadka Dadwaynaha Caalamiga ah, ICHS) iyo dano wadaagiisa Neighborhood House. yadoo kharash dheeraada ay bixiyeen City of Seattle's Families and Education Levy (Qoysaska Magaalada Seattle iyo Levy-ga Waxbarashada). Caafimaadka iyo ku takhasusayaasha caafimaadka maskaxda ee ICHS waxay fidiyaan adeegyo iyo talooyin, shaqaalaha xarunta caafimaadka oo dheeraada waxaa ka mid ah barayaasha, hagayaasha bukaanka iyo isku duba ridaha shaybaarka daryeelka kuwaasi oo dhamaan wada shaqeeya si ay u fidiyaan adeegyo kala duwan si ay u taageeraan caafimaadka caruurtaada, wanaaga iyo guusha waxbarasho.

Adeegyada ay xarunta caafimaadku u fidiso ilmahaaga waxaa ka mid ah (laakiin ayna ku koobnayn):

- Daryeel tayo leh oo isla goobta ah oo ay sameeyaan Fidiye Ruqsad leh ee Caafimaadka ama Caafimaadka Maskaxda
- Balamaha wakhtiga dugsiga iyo ka dib
- Tijaabooyin jireed iyo qiimayn caafimaad (taasi oo ay ku jiraan tijaabada jireed ee inuu qofku cayaari karo cayaaraha iyo tijaabooyin kale)
- Talaadada iyo daawaynta
- Helida xanuunka iyo daawaynta xanuunka iyo dhaawacyada
- Qiimaynta iyo la talinta ku saabsan caafimaadka maskaxda
- Talooyinka quudinta
- Daryeelka caafimaadka taranka
- Daryeelka caafimaadka ka hortagida taasi oo ay ku jiraan dhaqdhaqaaqyada waxbarashada caafimaadka
- Daryeelka caafimaadka guriga, taasi oo ay ku jiraan isku duba ridida daryeel caafimaad oo dheeraada ee shaybaarada kale ee fidinaya adeegyada caafimaad iyo ilkood
- U tilmaamida fidiyayaasha daryaalka caafimaad
- Tijaabooyin Ilkeed, raajooyin, iyo nadiifin

Arday kastaa waa inuu haystaa ogolaanshaha waalidka oo buuxa si uu u helo adeegyo buuxa. Ogolaanshaha waalidku wuxuu u baahan yahay buuxinta arjiga is diiwaan gelinta ku lifaaqan iyo sexeexa ilaaliyaha la aqoonsan yahay ee ardayga. Qorshayaasha caymiska dadwaynaha, sida Medicaid oo si caadiga ah daboosha dhamaan kharashka adeegyada ardaygaaga ee xarunta caafimaadka. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad leedahay caymis gaar ah qorshahaagu waxaa suurta gal ah inaanu daboolin dhamaan kharashka daryeelka xeerarka caymiskuna ay u baahan karaan in biilka ICHS laga bixiyo jeebka. Si kastaba ha ahaatee, ardayda loo diidi maayo adeegyada sobobo la xiriira awood la'aanta bixinta lacagta.

Waxaan ku farax sanahay in awoodno u fidinta ardayda daryeelka caafimaadka dugsiga-ku salayan oo tayo sare leh. Waxaan aaminsanahay in tani ardayda u tahay firaaqo gaar ah oo ay ku bartaan sida loo daryeelo caafimaadkooda. Nagula soo biir dadaalkani.

Fadlan buuxi sexeexna arjiga ogolaanshaha ku lifaaqan una soo celi Xarunta Caafimaadka ee Seattle World School. Waxaad xor u tahay inaad ku hakato lana kulanto shaqaalaha shaybaarka ama wac haddii aad hayso wax su'aalaha oo ku saabsan shaybaarka iyo adeegyadiisa.

Fadlan sexeex ogolaanshaha xaga dambe

Seattle World School Teen Health Center
1700 E Union St. Seattle, WA 98122 206-332-7160

ICHS International Community Health Services

Neighborhood House
Strong Families. Strong Communities. Since 1906.

NG#_____

Xarumaha Caafimaadka Dugsiga-ku Salaysan ICHS
Ogolaanshaha Adeegyada Caafimaadka

Xarumaha Caafimaadka Dugsiga-ku Salaysan ee ku yaala Seattle Public Schools (Dugsiyada Dadwaynaha Seattle) waa inay arji ogolaansho oo sexeexan ka haystaan waalidka iyo ilaaliyaha la aqoonsan yahay ka hor intaanay dhalinyarada siin adeegyada, marka laga reebo xaaladaha marka dawlada dhexe iyo/ama sharciyada gobolku u ogolaadaan dhalinyarada helida daawayntan oo kale iyadoon waalidka ama ilaaliyuhu ogolaan. Haddii dhalinyaradu iska diiwaan galiyeen dugsi laakiin aanay iska diiwaan galin School-Based Health Center (Xarunta Caafimaadka Dugsiga- ku Salaysan, SBHC), isaga/iyadu waxay sii wadan karaan helida adeegyada kalkaalisada dugsiga.

Waxaan halkan ka codsanaya kana ogolaanayaa in:

Magaca Dhalinyarada oo daabacan:_____ _____

Magaca Hore Magaca Dhexe Magaca Dambe Taariikhda Dhalasho

Dugsiga:_____ **Sanadka qalinjabinta:**_____

Inaan helo adeegyada daryeelka caafimaadka diyaarka ah haddii shaqaalaha SBHC gartaan inay lagama maarmaan tahay. Adeegyadani waxaa ka mid ah, laakiin ayna ku koobnayn, kala talinta caafimaadka maskaxda, tijaabooyinka kale ee caafimaad, adeegyada ku taxaluqa Ilkaha(oo ay ku jiraan, laakiin ayna ku koobnayn, tijaabooyinka ilkaha, raajoyin, iyo nadiifin), tijaabada jireed ee inuu qofku cayaari karo cayaaraha, daryeelka wanaaga-dhalinyarada, qiimaynta iyo daawaynta xanuunka daran iyo dhaawacyada, talaalada, barista dhiiga, sawirada iyo x-ray-ga. Ogolaanshuhu sidoo kale siiyaa tilmaanta daryeel haddii loo baahdo, gaadiid degdega oo ku aadan fidiyayaasha kale, ku takhasusayaasha daryeelka caafimaadka, isbitaalada, shaybaarada iyo wakaaladaha daryeelka caafimaadka haddii ay garato Xaruntu iyo shaqaaleheeguba inay lagama maarmaan tahay. Ogolaanshahani ma amrayo in adeegyada la siiyo iyadoon dhalinyaradu ogolaan, ilaa isaga/iyada ay ku guuldaraystaan inay ogolaansho bixiyaan.

Marka ogolaanshuhu fidiyo daryeelka, macluumaadka oo dhan si kalsooni ah ayaa loo xafiday, marka laga reebo xaaladahan soo socda:

1. Macmiilka oo ogolaansho ku bixiya sii daynta macluumaad sexeexan.
2. Haddii isagu/iyadu tilmaamaan inay khatar dhibaato ku yihiin nafsadooda ama kuwa kale.
3. Isagu/iyadu ay jirto dhibaato caafimaad oo naftooda khatar ku ah ayna d'adoodu ka yar tahay 18 sanadood.
4. Inay jirto sobob looga shakiyay dhibaatayn ama dayacaad.
5. Xanuunada la isku gudbiyo waa in la wargaliyaa maamulayaasha caafimaadka dadwaynaha.

Ogolaanshaha waxaa loo siiyay in lala wadaago fidiyayaasha daryeelka caafimaadka SBHC macluumaadka lagama maarmaanka ah, taasi oo ay ku jiraan is waydaarsiga macluumaadka u dhexeeya xanaaneeyaha caafimaadka maskaxda, fidiyaha caafimaadka, iyo Kalkaalisada Dugsiga, iyadoo ay ujeedadu tahay fidinta daryeelka ugu fiican ee ardayga kor lagu xusay. Si loo dardar galiyo isku duba ridida daryeelka, diiwaanka caafimaadka ardayga ee Xarunta Caafimaadka Dugsiga ku Salaysan waxay u furnaan doonaan shaqaalaha SBHC ee Xarunta Caafimaadka Dadwaynaha Caalamiga ah.

Waxaa suurta gal ah in ardaydu sidoo kale si xor ah uga helaan adeegyada caafimaad mid ka mid ah shaybaarada caafimaadka ICHS. Ogolaansho ayaa la siisay adeegyada laga helayo mid ka mid ah shaybaarada caafimaadka ICHS. Marka Balan sa maneysit, numberkan anaga weeye karta 206-788-3700.

Ogolaanshaha adeegyada waa la ogolaaday ilaa inta dhalinyaradu ay ka diiwaan gashan yihiin Seattle World School (Dugsiga Dunida Seattle). Waxaa suurta gal ah inaan doorto inaan wakhti kasta ka noqdo ogolaanshaha anigoo qoraal u diraaya Xarunta Caafimaadka.

Sexeexa Ardayga:_____ Taariikhda:_____

Sexeexa Waalidka /Ilaaliyaha:_____ Taariikhda:_____

Magaca/Xiriirka ka dhexeeya Masuulka Ilaaliyaha la Aqoonsan yahay (daabac magaaca):_____

MACLUUMAADKAAGA

Sida Sharciga Gobolka Washington Dhigayo, waxaa suurta gal ah in dhalinyarada da'kastaa ay si hor ah u heli karaan daryeelka caafimaadka taranka iyadoon waalidka ama ilaaliyuhu ogolaan (RCW 3.02.100(1 iyo 2)). Waxaa suurta gal ah in dhalinyarada laga soo bilaabo 13 jir ay si xor ah u heli karaan daroogada iyo adeegyada khamriga iyo kala talinta caafimaadka maskaxda (RCW 70.96A.095, RCW 70.96A.0097, RCW 71.34.530, iyo RCW 71.34.500) iyo daryeelka STD (cudurada galmada la iskugu gubdiyo) laga soo bilaabo 13 jir (RCW 70.24.110) iyadoon waalidka ama ilaaliyuhu ogolaan. Xarunta Caafimaadka Dugsiga-ku Salaysani waxay dhalinyaro kasta ku dhiiri galinaysaa inay ka qayb qaataan go'aanada daryeelka caafimaad ee isaga/iyada waalidkooda ama ilaaliyahooda markasta oo ay suurta gal tahay.

Haddii ay lagama maarmaan noqoto, SBHC waxay dhalinyarada ka wargalin doontaa xulashooyinka kana caawin doontaa dhalinyarada siday u heli lahaayeen daryeel dibadeed. SBHC waxay dhalinyarada ka caawin doontaa kala hadalka xaaladahani waalidka/ilaaliyaha.

Ogolaanshaha dhalinyarada si sharci ah ayaa loogu baahan yahay sii daynta macluumaadka ku saabsan noocyada xanuunada iyo daawaynta soo socda, uurka xanuunada galmada la iskugu gudbiyo (sida tijaabada HIV/AIDS), iyo khamriga/daroogada ama kala talinta caafimaadka maskaxda.

NG#_____

Adeegyada caafimaadka dadweynaha
Warqada ogolaansha waalidka
2016-2017 Ansixin

Public Health – Seattle & King County
School-Based Partnerships Program
401 5th Ave #1000 Seattle, WA 98104
206.263.8350

Seattle World School Teen Health Center
International Community Health Services (ICHS)
1700 E Union St. Seattle, WA 98122
206.971.0810

Oggolaashada Siidaynta Xogta Waxbarashada Sida waafaqsan Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Xeerka Asturnaanta (FERPA)

Aniga waxaan ogolaanayaa siideynta ilma hayga diiwaankiisa wax barasho ee ka imaaneysa Degmo Dugsiyeedka seattle si ay u aadaan Hay'adaha kor ku qoran. Waxaan fahansanahay diiwaanka waxbarashada waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn:

1. Magaca ardeyga iyo meesha lagala xiriiro
2. War bixinta ardayga: ka mid tahy wax barasha gaarka ah iyo jinsiyada
3. Taariikheenta joogitaanka
4. Tariikheenta anshaxinta
5. Tariikheenta fasalada iyo dhibcahooda
6. Tariikheenta Darajooyinka imtixaanada
7. Taariikheenta diwaangelinta
8. Natiijooyinka casharada
9. Casharada soo socda iyo kuwa uu ka maqanaa

Siidayntaan waxaa ku jira ogalaansho loo ogolaaday in ay shaqalaha hay'adu gali karaan khadga lagu diiwaan galiyo waxbarashada ardeyga ayagoo isticmaalaya xog ogaalka otomatika ah oo loo marayo dugsiyada dad weynaha ee Seattle.

Waxaan fahansanahay u jeedada rikoodhayadan loola wadaagayo xarumaha kor lagu sheegay inay tahay si ay u wargaliyaan ilmahayga xaruntiisa caafimaad ee dugsiga iyo/ ama bixiyaha caafimaadka maskaxeed bixiyo hormarkiisa warbarasho. Shaqaalaha Seattle & King County iyo Adeegyada caafimaadka dadwaynaha caalamiga ah, ICHS ayaa si wada jir ah ula shaqeynaya ilmaheyga dugsigiisa si ay ku jirto dadaal kor loogu qaadayo guusha ilmaha ee dugsiga. Jamacada Washington, qeybta maskaxda iyo habladhaqanka bulshada ayaa ogalaasho u heysan doonta in ay heleen diiwaanka wax barashada ee ilmahaaga oo kaliya. Ujeedaduna ay tahay dayactirka database aamin ah. Waxaan ogahay in aan diri karo codsi ku socda dagmo dugsiyeedka seattle iyo waaxda iskaashiga bulshada, MS: 32-159 P.O Box 34165 Seattle, Wa 98124.

Siideynta aqbarta la siideyn doono waxey ka koobantahy kuwa kor lagu sheegay oo ay ka midtahay taariikheyta ardeyga, midaasoo helitaankeetu uu bilaabanayo taariikhta warqadaan lasixiixo ilaa iyo December 31, 2017. waxaan ogalaasho siinayaa Dagmo dugsiyeedka Seattle in ay aqbaar siin karaan xarumaha kor lagu sheegay(fadlabn si fiican u qof):

Saxiixa waalidka (hadii da'yarta uu yahay 17 ama ka yaryahay): _____

Qof magaca waaridga: _____

Saxiixa ardeyga (Hadii da'yarta uu yahay 18 ama ka weynyahay): _____

Tariikhda maanta: _____

_____ _____

Magaca Ardayga (magaca hore iyo kan dambe) **Taariikhda dhalashada** ardayda

Seattle World School

_____

** **ID# Dugsiga** Ardayga **Dugsiga** Ardayga

***Waxaa laga heli karaa ardayga ASB kaarka, kaarka warbixinta , waraaqaha ay iskuulku , ama adiga la xiriir iskuulka ardaygaaga*

International Community Health Services
P.O. Box 3007
Seattle, WA 98114-3007 NG#_____

MACLUUMAADKA BUKAANKA

MAGACA (U DAMBEEYA, HORE, KA DHEXE)	MRN	SSN# - -	DHALASHADA - -	SINJI □ Dhedig □ Lab
CINWAANKA	MAGAALADA, GOBOLKA, CINWAANKA		DEGAANKA/DALKA	

LUQADA	XAALADA GUUR	LAMBARKA ARDAYGA	XAALADA HALGAMAANIMO	XAALADA BUKAANKA
QOWMIYADA ICHS	□ Kali ah □ Kala nool □ Xaas leh □ Is furay □ Garoob ah		□ Maya □ Diiday □ Haa – Ilmo leh □ Haa – Lamaane □ Haa – Kali ah □ Haa – Xaas leh □ Haa – Garoob ah	□ ACRS □ Xubin ka ah Gudiga Qoyska □ Xubin ka ah Gudida □ Shaqaale □ Xubin ka ah Shaqaalaha Qoyska □ Darbi jiif □ Arday Caalami ah □ Daryeel Ayna- Maamulayn ICHS □ Ruqsad Gaara □ Soo booqde □ Tabaruce
DARYEEL FIDIYAHA CAADIGA AH		SIGAAR CABA □ HAA □ MAYA		
TELEFOONKA GURIGA - -	TELEFOONKA GACANTA - -	CINWAANKA EMAIL-KA	TELEFOONKA XAALADA DEGDEGA AH # - -	MAGACA TELEFOONKA XAALADA DEGDEGA AH & XIRIIRKA KA DHEXEEYA

CADAYNTA DAKHLIGA	XAALADA DARBI JIIFNIMO		
□ U qalma □ U qalmin □ Kharash bixinta la joojiyay	□ Laba jibaarmaya □ Guryaha Dadwaynaha □ Ku meel gaara	□ Darbi jiif ahayn □ Hoy	□ Kuwo kale □ Jidka □ La garanayn/La soo wargalin

NAAFO AH/CURYAANA □ HAA □ MAYA	MUHAAJIR/QOXOOTI □ HAA □ MAYA	XAALADA SHAQAALAHA MUHAAJIRKA □ Muhaajir □ Beer Ka Shaqayn □ Wakhti leh (Seasonal)	LUQAD CAQABAD LEH □ HAA □ MAYA
TIRADA DADKA GURIGA KU NOOL	TIRADA CARUURTA EE KA YAR <18	XARUNTA CAAFIMAAD DUGSIGA KU SALAYSAN □ HAA □ MAYA	ASALKA
XAALADA GURIGA □ Kali □ Guri Laba Waalid ah □ Guri Gabar Masuul ka tahay □ Guri Nin Masuul ka yahay		GARGAAR GAARA □ HAA □ MAYA	AFKA LA DOORBIDAYO IN LA AKHRIYO
		QORSHE SUUQ GAYN	TAARIIKHDA MARAYKANA LA YIMID / /

MACLUUMAADKA QOFKA KA MASUULKA AH (HADDII UU KA DUWAN YAHAY QOFKA KORE)

MAGACA (U DAMBEEYA, HORE, KA DHEXE)	SSN# - -	WAKHTI DHALASHO - -	SINJI □ DHEDIG □ LAB	XIRIIRKA KA DHEXEEXA BUKAANKA
CINWAANKA	MAGAALADA, GOBOLKA, CINWAANKA	XAALADA GUUR □ KALI AH □ KALA NOOL □ XAAS LEH □ IS FURAY □ GAROOB AH		XAALADA ARDAYNIMO □ WAKHTI-BUUXA □ WAKHTI DHIMAN

TELEFOONKA GURIGA - -	TELEFOONKA GACANTA - -	TELEFOON NAMBARKA XAALADA DEGDEGA AH - -	MAGACA TELEFOONKA XAALADA DEGDEGA AH	CINWAANKA EMAIL-KA	XAALADA BUKAANKA

CAYMISKA KOOWAAD

MAGACA SHIRKADA CAYMISKA	MAGACA QOFKA CAYMISKA KU JIRA	SIYAASADA #	KOOXDA #
CINWAANKA SHIRKADA CAYMISKA		CADADKA COPAY-GA $	
MAGAALADA, GOBOLKA, CINWAANKA	TELEFOONKA	LACAGTA LAGA JARO $	
XIRIIRKA KA DHEXEEXA BUKAANKA		TAARIIKHDA DHAQAN GALKA \ \	TAARIIKHDA AY KU EG TAHAY \ \

******NUQUL KA SAMEE HALKA HORE & HALKA DAMBE EE KAARKA/KAARARKA CAYMISKA******

CAYMISKA LABAAD (haddii uu jiro)

MAGACA SHIRKADA CAYMISKA	MAGACA QOFKA CAYMISKA KU JIRA	SIYAASADA #	KOOXDA #
CINWAANKA SHIRKADA CAYMISKA		CADADKA COPAY-GA $	
MAGAALADA, GOBOLKA, CINWAANKA	TELEFOONKA - -	LACAGTA LAGA JARO $	
XIRIIRKA KA DHEXEEXA BUKAANKA		TAARIIKHDA DHAQAN GALKA \ \	TAARIIKHDA AY EG TAHAY \ \

Waxaan cadaynayaa in warbixinta sare inta aan ka ogahay ay sax yahay. Waxaan fahamsanahay in aan dhaqaale ahaan ka masuul ahay qaybta bukaanka ee lacag bixinta adeega sida uu sheegayo cabirka lacageed ee ICHS ama tilmaamaha lacag bixiyaha sadexaad (third party payer). Ogolaansho ayaa la siisay caymis bixiye kasta macluumaadkan oo kale si uu lagama maarmaanka u yahay in la dhamaystiro sheegashooyinka ICHS. Waxaan fahamsanahay in adeegyada aan la diidi doonin iyadoo ayna ku xirnayn bixin karid la'aantayda.

_____ _____

SEXEEXA BUKAANKA/ILAALIYAHA TAARIIKHDA

NG#_____

Seattle World School Teen Health Center- Student Health History Form

Magaca Ardeyga:_____ **Taariikhda Dhalashada:**_____ **Luqada:**_____

Fadlan calamadee sanduuqa hadii uu ardeygu ama xubin ka tirsan qoyska ardeyga/ardeyda (tax xiriirkooda qaraabonimo) ay xaaladahan hasytaan:

XAALAD	ARDEY	QARAABO	XAALAD	ARDEY	QARAABO
Khamreysinimo			Dhiig Kar		
Neef			Waxbarashadoo ku adkaatay		
Dhibatooyinka Kaadi Heysta/Kalyaha			Dhibaatooyin Maskaxeed, Shacuur, iyoama bulsho		
Dhibaatooyinka Dhiiga baxa ama Dhiiga yarida			Qallal		
Dhibatooyinka Saxarada			Jirada Unuga dhiiga xanuunsan		
Lafo Jaban			Xaraarad Maqaarka		
Kaankaro			Dhibaatooyinka Caloosha		
Dhibaatooyinka Ilkaha			Miyir Beelid		
Sokoroow/Macaan			Nafta iska Qaadid		
Madax xanuun			Thalassemia		
Xaaladaha Wadnaha			Dhibaatooyinka Qanjirka Hunguria		
Cagaarshoow			Qaaxo/Tiibisho		
HIV/AIDS			Kuwa Kale		

Qaliin/Cusbitaal la dhigay:_____

Dawooyinka Hada u socoda:_____

Xasaasiyada: Cunto:_____ **Dawooyin:**_____**Talaal:**_____

Intii hada laga rabay Tallalada Ardeyga ma yihiin? _____Haa _____Maya _____Ma hubo

Haduu Ardeygu yahay Socoto/qaxooti, goormu yimid US yuuse la yimid?

_____

Ardeygu yuu la noolyahay? _____

Ma uga walwal qabtaa ardeyga wax ku taxaluqa armahan soo socoda?

WALAAC	Haa	Maya	WALAAC	Haa	Maya
Khamro ama Maandooriyayaal			Caafimaadka Guud		
Tumbaakhada la calaaliyo			Shacuurnimo		
Qaab Cunteed/Miisaanka			Hormarka Skuulka		
Wada Hadal			Gaari la raacida kuwa Sakhraansan		
Tarbiyad			Self-esteem		
Sakhraanimo Gaari lagu wado			Caafimaadka/adaabta Galmada		
Asxaab/Xiriir			Cabida Sigaarka		

Goorma ugu dambeeysay oo Ardeyga baaritaan Caafimaad lagu Sameeyo? _____

Miyuu/Miyeey martay baaritaanka Ilkaha sanadkii lasoo dhaafay? _____Haa _____Maya

Saxiixa: _____**Taariikhda:**_____
Bukaanka/Waalidka/Mas'uulka ka ah

ICHS International Community HEALTH SERVICES

NG#_____

Xuquuqda iyo Waajibaadka Bukaanka

Waxa aad xaq u leedahay:

- Inaad dooratid bixiye daryeel caafimaad oo ku siiya daryeel tayo leh.
- Inaad heshid daryeel lagugu siiyo goob ammaan ah, gaar ah, oo ixtiraam leh oo ay ku siiyaan shaqaale aqoon leh.
- In adeegyada laguu siiyo hab ixtiraamaya luqaddaada, dhaqankaaga iyo rumeyntaada.
- In macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga iyo daweyntaada lagugu siiyo ereyo aad fahmi kartid.
- In adeegyada lagu siiyo iyada oo aan lagugu sameyn takooris ku saleysan sinji, midab, cayn lab iyo dhedig, xaalad guur, dookh galmo, da', caqiido, diin, isir, aqoonsi cayn, macluumaad hidde, isticmaalka xayawaan adeeg, asal wadan, xaalad sooyaal, xaalad muwaadinnimo, ama jiritaanka naafo ah dareen, maskax ama jidh ama awoodda lacag-bixinta.
- Inaad macluumaadka ku saabsan saacadaha ICHS, adeeg-bixiyeyaasha, adeegyada, kharashyada iyo nidaamka lacag-bixinta lagugu siiyo luqad aad si fudud u fahmi kartid.
- In lagu wargaliyo haddii daryeelkaaga ay ka qaybqaadanayaan bixiyeyaal daryeel caafimaad oo tababar ku jira.
- Asturnaanta macluumaadkaaga daryeel caafimaad marka laga reebo wixii u rabo sharcigu ama heshiisyada shirkadaha caymiska.
- In koobiyada diiwaanadaada caafimaadka aad akhrisatid oo heshid gudaha wakhti caqli-gal ah.
- Inaad ogaatid in qof mas'uul ah/xubin qoys la ogeysiin doono marka xaalad degdeg ahi dhacdo ee laguu wareejiyo goob kale.
- Inaad weydiisatid gargaar ku saabsan dardaaranka hormiska ah ee loogu talogalay daryeelka caafimaadkaaga.
- In goor hore lagu ogeysiiyo si laguugu ogalaado inaad dooratid inaad ka qaybgashid iyo in kale wixii ah daraasaad cilmi-baadhis caafimaad ee tijaabo ah.
- Inaad ku qanacsanaan la'aantaada daryeelka si ixtiraam leh uga hadashid iyada oo la adeegsanayo habdhaqan cabasho/tabasho bukaan.

Waxa aad mas'uul ka tahay:

- Inaad na weydiisid su'aalo haddii aanad fahmin waxa laguu sheegayo.
- Inaad noo sheegtid wax kasta oo aad ka og tahay taariikhda caafimaadkaaga, caafimaadkaaga hadda, iyo wixii ah isbeddelo ee ku dhacay caafimaadkaaga.
- Inaad noo sheegtid dhammaan wixii ah dawooyin, dhir, kabisyo cunto, iyo dawooyinka la iibsado waraaq la'aan ee laga yaabo inaad qaadatid.
- Inaad ka qaybgashid daryeelkaaga adiga oo gaadhaya go'aano, raacaya fariimaha oo qaadanaya mas'uuliyadda doorashooyinkaaga.
- Inaad raacdid qorshaha daweyn ee aad isla ogolaateen daryeel bixiyahaaga. Waxa tan ku jira inaad raacdid fariimaha xirfadleyaasha daryeel caafimaad ee kale ee hirgalinaya amarada daryeel bixiyaha.
- Inaad dooratid xubin qoys ama qof kale oo wakiil kuu ah haddii aanad awoodin inaad naftaada u gaadhid go'aamo daryeel caafimaad.
- Inaad bukaanka kale, booqdeyaasha, tabaruceyaasha iyo shaqaalaha iyo mulkiga ICHS ula dhaqantid si leh xishmad iyo ixtiraam.
- Inaad wakhti sax ah ku timaadid dhammaan ballamahaaga oo aad goor hore noo soo sheegtid haddii aanad awoodin inaad timaadid ballantaada.
- Inaad na siisid macluumaad sax ah oo lagaga shaqeeyo daboolka caymiska, iyo inaad bixisid wixii ah qayb-bixinno, qaddarada qayb-bixin caymis, iyo ka-jarisyo adiga oo ku bixinaya wakhti haboon marka lagu weydiisto.
- Inaad daryeel bixiyahaaga u sheegtid wixii ah dardaaran hormaris ah ama awood wakiilnimo caafimaad ee jira.
- Inaad u dhaqantid hab haboon marka ay adeegyo ku siinayaan shaqaalaha ICHS ama marka aad joogtid goobaha iyo munaasabadaha ICHS. Haddii laga baaqdo in la raaco fariimaha shaqaalaha ICHS, ama laga baaqdo in la adeeco habdhaqannada iyo heshiisyada daweynta, ama marka diidmada daweyn ay joojinayso bixinta daryeel haboon oo ammaan ah, ogeysiis la'aan ayaa la joojin doonaa xidhiidhka lala leeyahay bukaanka.

_____ _____

MAGACA BUKAANKA TAARIIKH

KU DHAQANKA OGAYSIISKA GAAR AHAANSHAHA
MAHAD NAQ

Si aad ugu hogaansanto caymiska Caafimaad ee Qaadasahda iyo Xeerka la Xisaabtanka (HIPAA), Sharciga Gaar ahaanshaha, ICHS ayaa loo baahanyahay si uu kuu siiyo Ku dhaqankayaga Ogaysiiska Gaar ahaanshaha. Tani waa in lagugu wargeliyo adiga in aanu ka hayno diiwaanka adeegyada daryeelka caafimaad ee aanu bixino. Waxaad waydiin kartaa in aad aragto nuqul diiwaankaas ah. Waxaa dhici karta in aad sidoo kale waydiiso in aad saxdo diiwaanka. Uma shaacin doono diiwaankaaga kuwa kale iyaddoo aan nagu jihayso in aanu sidaas samayno mooyee ama iyaddoo sharcigu ogolaado mooyee ama uu nagu khasbo in aan sidaas samayno. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xidhiidh waaxdayada Diiwaanka Caafimaad:

International District Clinic	(206) 788-3712
Holly Park Clinic	(206) 788-3541
Bellevue Clinic	(425) 373-3012
Shoreline Clinic	(206) 533-2612

Foomkan waxaa lagu hayn doonaa diiwaankaaga caafimaad.

Saxeexayga hoose waxaan ku qirayaa helitaanka Ku dhaqanka Ogaysiiska Gaar ahaanshaha.

Magaca Buuxa ee Bukaan jiifka (DAABAC)	Taariikhda dhalasho eev bukaanka
Saxeexa bukaanka ama wakiil amar haysta (haddii bukaanka ka yar yahay 18)	Taariikh
Magaca oo baabacan ee wakiilka u saxeexay bukaanka	Xidhiidhka

Fiiro

Koobi ayaa la siiyay bukaanka ama wakiilka amar haysta.

Ogeysiiska Hab-dhaqannada Asturnaanta
(Taariikhda Hirgalidda Sibtember 2013)

OGEYSIISKANI WAXA UU SHARAXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI DOONO LOONA BIXIN DOONO IYO SIDA ADIGU AAD MACLUUMAADKAN KU HELI KARTID.

FADLAN SI TAXADIR LEH U AKHRI.

Waxa sharcigu naga rabaa in aanu illaalino asturnaanta macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan oo aanu ku siino ogeysiiska waajibaadkayaga sharci iyo hab-dhaqannadayada asturnaanta ee la xidhiidha macluumaadkaas. Waxa la naga rabaa in aanu adeecno qodobada Ogeysiiska Hab-dhaqannada Asturnaanta ee hadda jira, laakiin waxa noo dhawrsan xaqa in aanu wax ka beddelno qodobadaas wakhti kasta. Wixii isbeddelo ah waxay noqon doonaan kuwo hirgalaya isla markiiba waxana aad ka heli kartaa bartayada internetka (www.ichs.com).

SIDA AANU U ISTICMAALI KARNO UNA BIXINA KARNO MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA EE BADBAADSAN

Daweyn Daraadeed. Waxa aanu macluumaadkaaga caafimadka u isticmaali karnaa in aanu ku siino daweyn. Waxa aanu macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan siin karnaa dhakhaatiir, kalkaalisooyin ama shaqaalaha cisbitaalka ee kale ee lug ku leh daryeelka lagugu siinayo cisbitaalka. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in dhakhtarkaagu u baahdo inuu takhasusleyaal kala tashado daryeelkaaga. Macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan ayaa lala wadaagi doonaa si looga caawiyo inay fahmaan baahiyahaaga daryeel caafimaad.

Lacag-bixin. Waxa aanu isticmaali karnaa ama bixin karnaa macluumaadkaaga caafimaad ee badbaadsan si kharashka daweynta iyo adeegyada aad ka heshid International Community Health Services (“ICHS” ama “anaga”) loogu dalaco adiga, shirkad caymis ama cid saddexaad. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanu u baahano in aanu caymiskaaga caafimaadka siino macluumaad ku saabsan qalitaan laguu sameeyay si caymiskaaga caafimaadku noo siiyo lacag ama adiga kuugu soo celiyo kharashka qalitaanka. Macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan ma siin doono lacag-bixiye ah cid saddexaad iyada oo aan adiga lagaa haysan oggolaansho iyada oo sharcigu oggol yahay in sidaa la sameeyo mooyaane. Waxa aad xaq u leedahay inaad weydiisatid xadeyn la saaro bixinta macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan ee la siin lahaa caymis caafimaad ama cid kale marka macluumaadkaasi ku saabsan kaliya daryeel caafimaad ama adeeg uu lacag naga siiyay adiga ama qof kale oo wakiil kaa ahaa (oo aan ahayn caymis caafimaad), waxana la naga rabaa in aanu aqbalno codsi sidaas oo kale ah.

Hawlaha Daryeelka Caafimaadka. Waxa laga yaabaa in aanu isticmaalo oo bixino macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan si loo fuliyo hawlo daryeel caafimaad. Isticmaaladaas iyo bixinnadaasi waxay lagama-maarmaan u yihiin in la sugo in dhammaan bukaankayagu ay helaan daryeel tayo leh. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanu isticmaalno macluumaad caafimaad si loo qiimeeyo adeegyo daryeel caafimaad oo lagu siiyay ama si loo qiimeeyo waxqabadka shaqaalahayaga.

ISTICMAALADA KALE EE LA OGGOL YAHAY EE LAGU SAMEYN KAROMACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA EE BADBAADSAN IYADA OO AAN LOO BAAHANOGGOLAANSHO HORMARIS AH OO LAGAA HELO

Shuraako Ganacsi. Qaar ka mid ah adeegyada laga bixinayo ICHS waxa loo maraa qandaraasyo lala galo shuraako ganacsi. Tusaalooyinka waxa mid ah shaybaadh, xisaab-hubiyeyaal dibadda ah, qareeno dibadda ah iyo kuwo kale. Markasta oo aanu heshiis u dhexeeya shuraako ganacsi iyo ICHS uu keenayo isticmaalka ama bixinta macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan, waxa aanu yeelan doonaa heshiis qoran oo badbaadin doona asturnaanta macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan.

Isgaadhsiin Lala Yeesho Cid Caawimaad ka Geysanaysa Gurmad Masiibo. Waxa laga yaabaa in aanu siino macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan cid caawimaad ka geysanaysa gurmad masiibo si qoyskaaga loo ogeysiin karo xaaladdaada, sida aad tahay, iyo goobtaada.

Xusuusin Ballamo. Waxa laga yaabaa in aanu kula soo xidhiidhno si laguu xusuusiyo inaad leedahay ballan ku saabsan daweyn ama adeegyo daryeel caafimaad oo ah ICHS.

Daweyn Beddelaad ah – Waxa laga yaabaa in aanu macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan isticmaalno si laguugu sheego ama laguugu taliyo ikhtiyaaro daweyn oo suurtogal ah ama beddelaadyo laga yaabo in aad xiiseynaysid.

Cilmi-baadhis. Xaaladaha qaarkood markay jiraan, ICHS waxa laga yaabaa inay isticmaasho oo bixiso macluumaad caafimaad dadweyne sababta oo ah ujeedooyin cilmi-baadhis caafimaad. Xaaladaha badidooda, waxa aanu ku weydiin doonaa inaad bixisid oggolaansho gaar ah haddii cilmi-baadhuhu uu heli doono magacaaga, adreeskaaga, ama macluumaad kale oo sheegaya qofka aad tahay. Ka hor inta aanaanu macluumaad caafimaad u isticmaalin ama u bixin cilmi-baadhis. Xaaladaha badidooda, waxa aanu ku weydiin doonaa inaad bixisid oggolaansho gaar ah haddii cilmi-baadhuhu uu heli doono magacaaga, adreeskaaga, ama macluumaad kale oo sheegaya qofka aad tahay. Waxa laga yaabaa, hase yeeshee, in aanu macluumaad caafimaad oo adiga kugu saabsan siino dad diyaarinaya mashruuc cilmi-baadhis in alaale inta macluumaadka caafimaadku aanu dibadda uga bixin ICHS.

Sida Uu Amrayo Sharcigu. Waxa aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan bixin doonaa marka in sidaa la sameeyo uu rabo sharciga federalka, gobolka, ama degmada.

Si Looga Baxsado Halis Culus oo ku Soo Fool Leh Caafimaadka ama Ammaanka. Waxa laga yaabaa in aanu isticmaalmo oo bixino macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan marka ay lagama-maarmaan tahay si looga hortago halis culus oo ku soo aadan caafimaadkaaga ama caafimaadka iyo ammaanka dadweynaha ama qof kale. Hase yeeshee, bixin kasta oo la sameeyo waxay noqonaysaa mid la siiyo qof awoodi kara inuu ka hortago halista.

Deeqda Xubin iyo Cad Jidh. Haddii aad tahay deeq-bixiye xubin jidh, waxa laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan siino hay’adaha ka shaqeeya keenista xubin jidh ama rakibidda xubin, il, ama cad ama siino kayd deeq-bixin xubin, taasoo ah sida ay lagama-maarmaan ugu tahay in la fududeeyo deeq-bixinta iyo rakibidda xubin ama cad jidh.

Ciidanka iyo Soo-yaalka Ciidan. Haddii aad ka tirsan tahay ciidamada qalabka sida, waxa laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan u bixino sida ay u rabaan madaxda taliska ciidanka. Waxa kale oo laga yaabaa in aanu macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan ee ku saabsan qof ka tirsan ciidan ajanabi siino madaxa ciidan ajanabi ee haboon.

Magdhow Shaqaale. Waxa laga yaabaa in aanu bixino macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan oo siino magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyo la mid ah. Barnaamijyadaasi waxay bixiyaan kaalmooyin marka ay jiraan dhaawacyo ama cuduro la xidhiidha shaqo.

Caafimaadka Dadweynaha. Sida uu rabo sharcigu, waxa laga yaabaa in aanu macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan siino hay’adda caafimaadka dadweynaha ama maamul sharci ah oo u xilsaaran ka hortagga ama xakameynta cudur, dhaawac, ama naafo.

Hawlaha Kormeerka Caafimaadka. Waxa laga yaabaa in aanu macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan siino hay’ad kormeer caafimaad sababta oo ah hawlo uu oggolaaday sharcigu. Hawlahaas kormeeridda waxa ka mid ah, tusaale ahaan, xisaab-hubin, baadhitaano, hubin, iyo liisan bixin. Hawlahaasi waxay lagama-maarmaan u yihiin in dawladdu la socoto nidaamka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada dawladda, iyo adeecidda xeerarka xuquuqda madaniga.

Dacwado iyo Muran. Haddii aad ku jirtid dacwad ama muran, waxa laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan bixino si looga jawaabo amar maxkamad ama maamul. Waxa kale oo laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan bixino si looga jawaabo yeedhis maxkamad, codsi daah ka qaadis, ama hab kale oo sharci ah oo uu la yimaado qof kale oo ku jira muranka.

Fulinta Sharciga. Waxa laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan bixino haddii in sidaas la sameeyo uu weydiisto sarkaal fulin sharci:

- Iyada oo laga jawaabayo amar maxkamad, yeedhis maxkamad, amar imaansho maxkamad, amar yeedhis maxkamad, ama hab la mid ah;

• Si loo garto oo loo helo la-tuhme, qof baxsad ah, markhaati goobjooge ah, ama qof la waayay;
• Iyada oo ku saabsan dhibane dambi haddii, marka ay jiraan xaalado gaar ah oo xadidan, aanaanu awoodin in aanu helno oggolaanshaha qofka;
• Iyada oo ku saabsan geeri aanu rumeysanahay inay ku timid fal dambi;
• Iyada oo ku saabsan dhaqan dambi ah oo ka dhacay ICHS;
• Marka ay jiraan xaalado kedis ama degdeg ah si looga warbixiyo dambi; goobta dambiga ama dhibaneyaasha; ama aqoonsiga, sharaxaadda, ama goobta qofka galay dambiga.

Geeri Baadheyaal, Baadheyaal Caafimaad, iyo Maamuleyaal Aasid. Waxa laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan siino geeri baadhe ama baadhe caafimaad. Tan wax laga yaabaa inay lagama-maarmaan tahay, tusaale ahaan, si loo garto qof dhintay ama loo go'aamiyo sababta geeri. Waxa kale oo laga yaabaa in macluumadka caafimaadka ee ku saabsan bukaanka cisbitaal aanu siino maamuleyaal aasid taasoo ah sida ay lagama-maarmaan ugu tahay gudashada waajibaadkoodka.

Hawlaha Ammaanka Qaranka iyo War-ururinta. Waxa laga yaaba in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan siino saraakiisha federalka ee amar haysta sababta oo ah war-ururin, lid-war-ururin, iyo hawlo ammaan qaran oo kale oo uu oggolaaday sharcigu.

ISTICMAALO IYO BIXINNO CAYIMAN OO U BAAHAN OGGOLAANSHO

Badi isticmaalka iyo bixinta qoraalada daweynta maskaxda, isticmaalka iyo bixinta macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan ee ujeedkiisu yahay suuq-geyn, bixinta noqonaysa iibin macluumaad caafimaad oo badbaadsan, iyo isticmaalo iyo bixinno kale oo ku saabsan macluumaad caafimaad oo badbaadsan oo aan lagu sheegin Ogeysiiskan waxa kaliya ee la sameyn doonaa marka lagaa haysto oggolaansho qoran. Haddii aad ICHS siisid oggolaansho in la isticmaalo ama la bixiyo macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan, waxa aad dib uga noqon kartaa oggolaanshahaas, wakhti kasta, qoraal ahaan. Haddii aad dib uga noqotid oggolaanshahaaga, waanu joojin doonaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan u isticmaalno ama u bixino sababaha uu sheegayo oggolaanshahaaga qoran. Waa inaad fahamtid in aanaanu awoodin in aanu dib u soo celino wixii bixin ah ee aanu hore u sameynay iyada oo la adeegsanayay oggolaanshahaaga, iyo in la naga rabo in aanu hayno diiwaanada daryeelka aanu ku siinay.

Isgaadhsiin Lala Yeesho Qoyska iyo Saaxiibo. Waxa laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan la wadaagno xubno qoys ama saaxiibo lug ku leh daryeelkaaga iyo/ama bixinta kharashka daryeelkaaga haddii aad noo sheegtid in aanu sidaa sameyn karno, ama haddii aanad diidin wadaagista macluumaadkan. Waxa kale oo laga yaabaa in aanu macluumaad muhimad leh la wadaagno dadkaas haddii, anaga oo isticmaalayna garaadkayaga xirfadeed, aanu rumeysan nahay in aanad diidanayn.

XUQUUQDAADA KU SAABSAN MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA EE BADBAADSAN

Inkasta oo diiwaankaaga caafimaad uu yahay hanti ay leedahay ICHS, adiga ayaa iska leh macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan. Waxa aad leedahay xuquuqda soo socota ee ku saabsan macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan:

Xaqa Ogeysiiskan. Waxa aad xaq u leedahay koobi waraaq ah oo ah Ogeysiiskan. Waxa aad na weydiisan kartaa in aanu ku siino koobi wakhti kasta. Waxa kale oo koobi ah ogeysiiskan aad ka heli kartaa bartayada internetka: **www.ichs.com.**

Xaqa Inaad Fiirisid oo Koobigareysid. Waxa aad xaq u leedahay inaad fiirisid oo koobi ka heshid macluumaadka daryeelka caafimaadka qaarkood ee kugu saabsan uuna ku jiro diiwaanada lacag-dalacidda. Waa inaad codsigaaga ku soo gudbisid qoraal ahaan kuna soo hagaajisid:

International Community Health Services
Attn: Health Center Manager
PO Box 3007, Seattle WA 98114-3007

Haddii aad weydiisatid koobi ah macluumaadkaas caafimaad ee badbaadsan, waxa laga yaabaa in aanu kharash saarno hawlaha koobigareynta, ku soo dirista boosta, ama alaabta kale ee la xidhiidha codsigaaga.

Waxa dhici karta in aanu diidno codsigaaga inaad fiirisid oo koobigareysid marka ay jiraan xaalado xadeysan oo cayiman. Haddii laguu diido inaad heshid diiwaankaaga caafimaadka, waxa aad weydiisan kartaa in diidmada dib looga fiirsado. Waanu adeeci doonaa natiijada ka soo baxda dib-u-fiirinta.

Xaqa Weydiisasho Wax-ka-beddelid. Waxa aad xaq u leedahay inaad weydiisatid in macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan wax laga beddelo adiga oo codsi qoraal ah siinaya Maamulahayaga Xarunta Caafimaadka. Waxa aanu xaq u leenahay in aanu diidno codsigan marka ay jiraan xaaladaha qaarkood. Waxa aad soo qoran kartaa hadal khilaafid haddii codsigaaga la diido. Hadalka khilaafidda waxa lagu kaydin doonaa diiwaankaaga caafimaadka, waxana lagu dari doonaa bixin kasta oo lagu sameeyo diiwaanadaada.

Xaqa Xisaabin Lagu Sameeyo Bixinta. Waxa aad xaq u leedahay inaad heshid xisaabinta bixinta. Kani wuxu ku saabsan yahay diiwaanka bixinnada qaarkood ee aanu ku sameynay macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan iyada oo waafaqsan sharciga.

Waa inaad codsigaaga oo qoraal ah u keentid Maamulaha Xarunta Caafimaadka. Waxa dhici karta in aanu ku saarno kharashka siinta diiwaanka. Waanu ku ogeysiin doonaa kharashka meesha ku jira, waxana aad dooran kartaa inaad codsigaaga dib uga noqotid ama wax ka beddeshid wakhtigaas ka hor inta aanuu ku fuulin wax kharash ah. Maamulaha Xarunta Caafimaadka waxa lagala xidhiidhi karaa adreeska soo socda:

International Community Health Services
Attn: Health Center Manager
PO Box 3007, Seattle WA 98114-3007

Xaqa Codsiga Xadeynta. Waxa aad xaq u leedahay inaad na weydiisatid in aanu xadeyno isticmaalada iyo bixinnada qaarkood ee ku saabsan macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan. Tusaale ahaan, waxa aad na weydiisan kartaa in aanu xad u yeelno macluumaadka caafimaadka ee badbaadsan ee aanu siino qof lug ku leh daryeelkaaga ama bixinta kharashka daryeelkaaga. Waxa aad na weydiisan karta in aanaanu isticmaalin ama in macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan ee ku saabsan qalitaan laguu sameeyay aanaanu siin xubin qoys ama saaxiib. Waa inaad codsigaaga qoraal ahaan ugu soo gudbisid Maamulaha Xarunta Caafimaadka. Codsigaaga dhexdiisa, waa inaad noogu soo sheegtid (1) ka uu yahay macluumaadka aad rabtid in la xadeeyo; (2) inaad rabtid in la xadeeyo isticmaalkayaga, bixinta ama labadaba; iyo (3) cidda aad rabtid in lagu dabaqo xadeynta, tusaale ahaan, macluumaad la siin lahaa xaaskaaga/saygaaga; hase yeeshee, qasab naguma ah in aanu aqbalno xadeynta la codsaday.

Xaqa Codsiga Isgaadhsiin Qarsoodi ah. Waxa aad xaq u leedahay inaad na weydiisatid in marka ay jiraan arrimo caafimaad qaarkood aanu kuula soo xidhiidhno hab gaar ah ama kaala soo xidhiidhno goob gaar ah. Tusaale ahaan, waxa aad na weydiisan kartaa in aanu kaala soo xidhiidhno kaliya shaqada ama boostada.

Si aad u weydiisatid isgaadhsiin qarsoodi ah, waa inaad codsigaaga qoraal ahaan ugu soo gudbisid Maamulaha Xarunta Caafimaadka. Kuma weydiin doono sababta codsigaaga. Waa in codsigaagu sheegayo sida ama goobta aad rabtid in lagaala soo xidhiidho. Waanu tixgalin doonaa dhammaan codsiyada caqli-gal ah.

Xaqa in Lagu Soo Ogeysiiyo Xadgudub – Waxa aad xaq u leedahay in lagu soo ogeysiiyo xadgudub lagu sameeyay macluumaad caafimaad oo badbaadsan oo baylah ahaa.

Cabashooyin

Haddii aad aaminsan tahay in lagu xadgudbay xuquuqdaada asturnaanta, waxa aad la xidhiidhi kartaa ICHS Compliance Officer (Sarkaalka Adeecidda ee ICHS) oo lambarkiisu yahay 206.788.3658 ama cabashadaada qoraal ahaan ugu soo gudbi ICHS Compliance Officer (Sarkaalka Adeecidda ee ICHS) oo adreeskiisu yahay PO Box 3007; Seattle, WA 98114-3007.

Waxa kale oo aad cabasho ka xereysan kartaa Secretary of the U.S. Department of Health and Human Services (Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maraykanka).

Tayada daryeelkaagu ma gali doonto halis ama lagaama aargoosan doono sababta oo ah cabasho aad xereysatay.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan, fadlan ICHS Compliance Officer (Sarkaalka Adeecidda ee ICHS) kala xidhiidh 206.788.3658.